Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimmaha Siyaasada Soomaaliya (UNPOS)

**Warqad ku socota jaaliyadaha soomaaliyeed ee dalka dibadiisa ku nool.**
**Warqad No:16.**

## Nairobi 24 Luulyo 2009

Salaam Aleikum;

Sida ay caadadu ahayd waxaan dhamaantiin idin soo dirayaa salaan diiran.

Warqadan aan idin soo diraayo waxay warbixin idinka siinaysaa dhacdooyinkii ugu dambeeyey ee dalkiina maadaama xaalada wadanka ay mar walba is bedelayso, waxaa nasiib darro ah in dadka rayidka ah ay weli dalka ku dhibaatoonayaan gaar ahaan kuwa ku nool Mogadishu kuwaasoo si joogta ahi weerar ugu imaanayo dad xag-jirayaal ah oo ay ka mid yihiin Ajaaniib. Kumanaan aan waxba galabsan oo Soomaali ah ayaa lagu kalifay inay guryahoodii ka cararaan qaar waxay u barakaceen qeybo kala gedisan oo Caasimada ah kuwa kaleetona guryo carshaan ayey ugu nool yhihiin Afgooye. Waxaa Naxdin iyo Qalbi Jab leh in dad badani oo dadkan la barakiciyey ka mid ah ay ku soo noqdeen guryahoodii bishii Janaayo 2009 ayagoo rajaynayey inay nabad helayaan sida ay balanqaadeen kuwii ku andacoonaayey inay ka soo horjeedaan joogitaanka Ciidamada Ethiopia. Balse arintu sidan waa ka gedisan tahay Qoysas dhan oo ka kooban Haween iyo Caruur ayaa mar labaad guryahoodii ka cararaaya una cararaaya meel aan lahayn gabood ay ka galaan dhaxanta si ay u badbaadiyaan naftooda weligay dhibaatadan oo kale meel kale oo Africa ka mid ah kuma aanan arag. Waxaa aad iigu adag inaan u helo wax sabab ah dhibaatadan joogtada ah ee lagu haayo dadkan wax aanan geysan ee Soomaalida ah ayna ku hayaan qaar ka mid dadka wadankooda u dhashay. ***Allaah waaxidka ah wuxuu ku yiri Suuratul Qureysh ayaadaha 3aad iyo 4aad: Ha caabudeen (dadka) Allaha Beydkaan iska leh (Kacbada), kaasoo ka quudiya gaajada Cabsidana ka nabadgeliya.***

Dadka dagaalka wada inta ay ka naxaan dhibaatada Ummaddooda dagaalka ma ayan joojinin, inkastoo ayna ku guuleysan, kuwa doonaaya inay afgembiyaan Xukuumada ilaa bishii May ayaa weli dagaalka sii wada, kuwan dagaalka wada waxay Mogdishu mar labaad ka dhex abuureen dhiamasho iyo burbur hor leh, waxayna hoos u sii dhigeen Magacii iyo Muuqaalkii Ummadda Soomaaliyeed oo awalba sii liitay. Si kastaba arintu ha ahaatee, waxaan doonayaa inaan idin xaqiijiyo in aynan guuleysan doonin kuwa doonaya inay dalka burburkiisa sii wadaan.

Waxaa cad inay jiraan dad aan dooneynin in Soomaaliya dawladnimadeedii soo noqoto dagaalkana waxay u sii wadi doonaan si ay ujeedadoodu u garaan. Si kastaba ha ahaatee, waxaan ugu baaqayaa dhamaan dhinacyada ay arintani quseyso inay ka fekeraan waqtiga fog iyo mustaqbalka wadanka, waajibaadka Xukuumadu wuxuu ku

egyahay bisha Augosto 2011 waxaana naga xigta labado (2) sano oo kale, Xukuumadu albaabadeedu waxay u furan yihiin wadahadal ayna la galayso kuwa aaminsan geedi socodka Nabadda iyo soo noqoshada Xasiloonida. Markaan sidaas lee yahay ulama jeedo inay Xuukuumada ku soo biiiraan kuwa hadda dawlada diidan- dhinaca kale hadday doonayaan way ku soo biiri karaan Xukuumada- laakiin waxaa door u banaan yahay dadka mucaaradka ah. Geedi socodka nabada ee Jabuuti ayaa ah wadada keliya ee mustaqbalka furan ee ayna isla ogolaadeen Soomaalida iyo Bulshada Caalamkuba, waxaa mihimada arintaan ay ku socotaa kuwa daneynaaya ariimaha siyaasada doonaya inay taageeraan hanaanka siyaasadeed ee hadda socda rabana in dalka laga diyaargareeyo doorashooyin labo (2) sanno gudahood, taariikh ahaan waxyaabihii Soomaaliya laga bartay sanaooyinkii ugu dambeeyey waxay ka markhaati kaceen in adeegsigi xooga ee sida joogtada ah la iskugu dayey ay guul dareysteen nabad iyo xasiloonina lagu gaari waayey, sidoo kale waxaan iyadana shaqeyn doonin in si shirar siyaasadeed loo qabto lagu soo gabado arimo ku saabsan deggaanka iyo dhaqaale.

Walow ay arintu sidan tahay haddana Xukuumadu waa inay si joogto ah ee dhab ah ula hadashaa dhamaan Madaxda Soomaaliyeed iyo shaqsiyaadka danaynaya xasiloonida wadanka, heshiiska ay Xukuumadu la gashay AHLU SUNNAH WAL JAMEECA waa mid aad u wanaagsan waana in si buuxda oo aan kala dhantaalneyn loo hirgeliyaa, sidoo kaleetona heshiiskii n kooxda Xisbul-Islaam ee dhowaan Xukuumada ku soo biirtayna isna waa in sidiisii loo hergeliyaa Xukuumadana ku biiraan. Xukuumada iyo Xubnaha Barlamaanka waxaa looga baahan yahay in dalka joogaan howshoodana ay qabsadaan umana muujiyaan ummaddooda inay wax faa'ido ah u hayaan.

20kii July 2009 waxaan ka qeybgalay shir wadatashi ah ee uu lahaa Ururka Midowga Africa, Wadamada AMISOM ciidamada ugu deeqay iyo Saxiibada Caalamiga ah ee la shaqeeya Ururka Midowga Africa, shirkaasoo lagu qabtay ADIS-ABABA, Shirka waxaa uu hoosta ka xariiqay bayaankii ka soo baxay IGAD ee 20 May kaasoo ugu baaqayey Gollaha Amaanka inuu talaabo degdeg ah qaado oo ay ka mid tahay in xanibaad lagu soo rogo shaqsiyaadka Nabad-diidka ah, in la Xanibo duulimaadyada Garoomada Diyaarada qaarkood, in la xakameeyo Dekadaha qaarkood ee dalka ku yaala iyo in si xoog leh loo ilaaliyo xuduudaha wadanka si ay looga ilaaliyo in shaqsiyaad Ajaaniib ah wadanka ku soo noqdaan iyo in Maraakiib hub wada ay yimaadaan, dhamaan Go'aanada waxaa isla ogolaaday Ururka Midowga Africa. Shirkii Golaha Wasiirada IGAD ay ku yeesheen Magaalada Adis Ababa 10kii July ayaa si buuxda iskula ogolaaday in heshiikii Jabuuti uu yahay kan keliya ee rasmiga ah ee loo maraayo Nabada iyo Dib u heehsiinta Soomaaliya.

Waxaan kale oo aan ka qeybgalay kulan uu lahaa Guddiga u qaabilsan Nabada iyo Amniga Ururka Midowga Yurub loogana hadlaayey arimaha Soomaaliya. Kulankaas oo lagu qabtay BRUSSELLS 10ka bishan July 2009, Denjirayaasha Ururka Midowga Yurub waxay si buuxda u sheegeen taageerada buuxda ee ay u hayaan geedi socodka Nabada, waxaa kale balanqaadeen in Ururka Midowga Yurub ay si xoog leh u soo

dhexgeli doonaan arinta Soomaaliya, arintan waxaa kale oo isagana aad carabka ugu adkeeyey JAVIER SOLANA, Ergayga sare ee ururka Midowga Yurub u qaabilsan Siyaasada Arimaha Dibada iyo Amniga la wadaago ee Reer Yurub iyo STEFANO MANSERVISI Agaasimaha Guud ee Ururka Midowga Yurub u Qaabilsan Arrimaha Horumarinta. Sida ay caadadu tahay ururka Jaamacada Carabta, kan Islaamka iyo wadamo fara badan oo ay ka mid yihiin Mareykanka ayaa taageero buuxda laga haystaa. Golaha Amaanka ee Qaramada Midooway ayaa doonayaa inuu ka hadlo arimaha Soomaaliya Todobaadka Soo socda anigana waxaan doonayaa inaan ka qeybgalo.

Booqadashadaydii kadib, waxaa Mogadishu isna booqday Ku Xigeenkayga wuxuuna wadahadal aad faa'ido u leh uu la soo yeeshay Madaxweynaha, Ra'isal Wasaaraha, Golaha Wasiirada iyo Mas'uuliyiin kale, saaxiibo kale ayaa iyaguna u socdaalaaya Somaliland iyo Puntland, Xafiiskayga ayaa diyaargareynaaya inuu qabto kulano aad muhiim u ah bilaha soo socda waxaana ka mid kulamadaan kulan loogu qaban doono Washington saraakiishii sar sare ee Ciidamadii hore ee Soomaaliya iyo shir kale oo isagana ku saabsan Caddaalada iyo Dib u heshiisiinta oo isagana la qaban doono bisha soo socota.

Waxaa mar walba aad uga xumaadaa talaabada ay qaadayaan kuwa ku howshoon dheereynta wax u dhimista Umadda Soomaaliyeed waxaa kale oo iyadana aad ii dhibtay Afduubkii madax-furashada lagu raadinaayey ee loo geystay sadex (3) qof oo ku mashquulsanaa sidii loo kaalmeyn lahaa dadka masaakiinta ah ee ku nool Gobol Waqootyiga Bari ee Kenya, magaran karo aniga sida talaabo tan oo kale ah wax ugu tari karto Ummadda Soomaaliyed ama si kale aan u iraahdee Magaca Ummadda Soomaaliyeed waxaan ku baaqayaa in si deg deg ah lo sii daayo sadexdaan shaqaalaha Hay'adaha Smafalka ahaa iyo Ajaaniibta kale iyo Soomaalida sida sharci darada loo haysto, sidoo kale waxaan cambaareynayaa bililiqada loo geystay Xafiisyada Qarammada Midoway ee ku yaalay Jowhar, Wajid iyo Baydhoba talaabadan oo u muuqata mid aad loo qorsheeyey lana doonaayo in caqabad loo abuuro sidii kaalmo loogu geyn lagaa Ummaadda Soomaaliyeed ee dhibaataysan, sidoo kale waxaan ka xumahay ugaarsiga lagu hayo suxufiyiinta Soomaaliyeed.

Waxaan rajaynayaa inaan dhowaan la kulmo qaar idinka mid, waxaan rajaynayaa in dhamaantiin aad sii wadi doontaan taageerada aad siinaysaa geedi socodka nabada, xasiloonida iyo soo celinta sharafta Ummadda Soomaaliyeed. Waxaanu ku jirnaa waqti imtixaan ah laakiin waxaad ogaataan inay jirto rajo weyn iyo mustaqbal ifaaya waana inaan dhamaanteen u howlgalnaa si ay arintan dhab u noqoto.

Walaalkii Axmedou Ould-Abdalla